ISDIIWAANGELI SI AAD U CODEYSID MAALINKA DOORASHADA

Codeeyeyaasha waxa ay isticmaali karaan mid kasta ee ka mid ah fursadaha caddeynta degganaanshada si laysku diiwaangeliyo in laga codeeyo goobaha doorashada.

Kaarka Aqoonsiga ee wata Magaca iyo Cinwaanka Waqtiga Xaadirka

Karaarka Aqoonsiga ee la oggolyahay:

- Dareewalka shatigiisa sharciga ah ee Minnesota, Kaarka Aqoonsiga ee Minnesota, shatiga barashada gaari wadista ee Minnesota – ama rasiid kasta ee kuwaan ah.
- Kaarka Aqoonsiga Qabiilka ee wata magaca, cinwaanka, sawirka iyo saxiixa.

Sawirka Kaarka Aqoonsiga + Dukumiinti wata Magaca iyo Cinwaanka Waqtiga Xaadirka

Waxaa dhici karta in Kaarka Aqoonsiga uu waqtigiisa dhacay, iyo in documiintiga si eletroonig lagu muujin karo aalad (telefoonka gacanta ee casriga, iwlm).

Kaararka Aqoonsiga Sawirka leh ee la Oggolyahay:

- Darewaalka shatigiisa aqoonsiga, Kaarka Aqoonsiga gobolka ama kaarka shatiga gaari wadista ee gobol kasta.
- Baasaboorka Maraykanka.
- Kaarka Aqoonsiga Ciidamada Qalabka Sida ee Maraykanka.
- Kaarka Aqoonsiga qabiilka oo wata magaca, sawirka iyo saxiixa.
- Kaarka Aqoonsiga jaamacadda, kulliyadda, ama kulliyadda farsamada ee Minnesota.
- Kaarka Aqoonsiga dugsi sare ee Minnesota.

+

Dukumiintiyada la Oggolyahay:

- Qaansheegtada, akaawnka/warqadda bilowga adeegyada ku siman ama lagu taarikhay muddo laga joogo 30 cisho gudahood ee Maalinka Doorashada ay dhacayso:
  - o Telefoonka (ka guriga, gacanta, VOP, iwlm.).
  - o TVga (keybalka, satalaytka, iwlm.).
  - o Adeegyada internetka.
  - o Adeegyada dhuumaha wasakhda qaada.
  - o Korontada, shidaalka ama biyaha.
  - o Kaarka Bangiga ama amaahda.
  - o Lacagaha kirada ama rahanta guriga.
- Heshiiska kirada guriga (sharci ahaan sii jiraya Maalinka Doorashada).
- Warqadda ujrada ardaynimada ee waqtiga xaadirka.

Codeeyeyaasha Diiwaangashan ee Caddayn Kara Magacaaga iyo Cinwaankaaga

Codeeyaha ka diiwaangashan xaafaddaada waxa uu kuu raaci karaa goobta doorashada si uu u saxiixo warqadda dhaarta ee lagu sugayo cinwaankaaga. Codeeyaha diiwaangashan waxa uu markhaati u noqon karaa illaa sideed qofood.

Ogaysiiska Isdiiwaangelinta Soo Daahday

Haddii aad si horraansho isu diiwaangelisay wakhti aad ugu dhow Maalinka Doorashada, waxaa dhici karta in boostada laguugu soo diro Ogaysiiska Isdiiwaangelinta Soo Daahday. Oagaysiiskaan waxaa loo isticmaali karaa in laysku diiwaangeliyo.

Isdiiwaangelin Sax ah ee Isla Xaafadda

Haddii aad si rasmi ah u diiwaangashantahay xaafadda balse ay jirto in aad magacaaga baddashay amaba meel kale ee isla xaafadda ah aad u guurtay, waxa keliya ee loo baahanyahay in loo sheego sarkaalka doorashada ayaa ah magacaagi hore ama cinwaankaagi hore – warqado kale ee caddayn looma baahna.

Kaarka Aqoonsiga ee Ardayga Jaamacadda – Haddii Liistada Guriga Ardayga ku Qoranyahay la Keeno

Ardada jaamacadadaha ama kulliyadaha waxa ay isticmaali karaan kaarkooda aqoonsiga jaamacadda ama kulliyadda haddii jaamacadda ama kulliyadda ay saraakiisha doorashada u keento liistada guriga ardayga uu ku qoranyahay.

Qofka Shaqaalaha ka ah Rugta Caafimaad ahaan Loo Degganyahay

Haddii aad deggentahay rug caafimaad, qof shaqaale rugta ka ah ayaa kuu raaci kara goobta doorashada si ku xaqiijiyo cinwaankaaga.